

Qoraalka Sida Loo Qaado Tijaabada Calyada Guriga lagu sameeyo

[muusig kacsan]

[Warin] Sida Loo Qaado Tijaabada Calyada ee Guriga lagu sameeyo

Gobalka Minnesota iyo Adeegyada Caafimaadka ee Vault ayaa iska kaashanaaya inay bixiyaan baaritaanka calyada qof kasta, si bilaash ah.

Marka xirmadaada baaritaanka la keeno, waxaad heli doontaa iimeel kuu sheegaya in baaritaankaaga la keenay kuna siinaaya lifaaqa aad ka galayso webseetka Vault. Qaado baaritaankaaga COVID-19 sida ugu dhakhsiyaha badan ee suuragalka ah. Haddii aad qabto COVID-19, hadba sida ugu dhakhsiyaha badan ee aad ku ogaato, ayaa ah sida ugu dhakhsiyaha badan ee aad ku qaadi karto talaabooyin aad iskaga ilaaliso inaad ku faafiso dadka kale.

Si aad u qaadato baaritaanka calyada ee guriga, waxaad u baahan tahay khad fiican oo internet iyo taleefan casri ah ama laabtoob leh kaamiro shaqaynaysa.

Waxba ha cunin, ha cabin, sigaar ama ha ruugin waxba 30 daqiiqo kahor intaadan qaadan baaritaanka.

Markaad diyaar u noqoto inaad qaadato baaritaanka, gal webseedka Vault inta lagu guda jiro saacadahooda baaritaanka (Axad-Khamiis 7subaxnimo-7fiidnimo, Jimce-Sabti 7subaxnimo-5fiidnimo). Uma baahnid balan.

Waxaad geli doontaa qol sugitaan oo onleenka ah. Haddii ay dad badan qaadanayaan baaritaanka gurigooda maalintaas, waxaa laga yaabaa inaad sugto waqti. Ha qaadan baaritaanka weli.

Waxaa lagugu xiri doonaa muuqaal ahaan kormeeraha baaritaanka Vault kaasoo ku tusi doona sida aad baaritaanka iskaga qaadayso. Waxaad calyo ku tufi doontaa dublad ku xariirsan tuubad. Soo saarista cadadka loo baahan yahay ee calyada ayaa qaadanaysa 10-12 daqiiqo.

Kormeeraha baaritaanka ayaa kuu sheegi doona sida loo baakadeeyo baaritaankaaga si aad dib ugu celiso shaybaarka.

Marka aad dhamayso baaritaankaaga aadna si buuxda u xirto, kusoo qaad baakada horay loo baxshay ee UPS sida ugu dhakhsiyaha badan ee macquulka ah kuna rid sanduuqa boostada UPS ama dukaanka UPS si sanbalkaaga loogu qaado shaybaarka. Waxaa jirta aalad wax raadisa ood ka helayso webseetka UPS ood u adeegsan karto inaad hesho sanduuqa boostada ee UPS ama dukaan kuu dhaw.

Waa inaad natiijooyinkaaga ku heshaa iimeelka 24 ilaa 48 saacadood gudahood kadib marka shaybaarku helo sanbalkaaga.

Haddii aad qabto su'aalo, u baahan tahay turjumaan ama u baahan tahay qaabilaad wac 800-800-5698 ama iimeel udir accessibility@vaulthealth.com si lagaaga caawiyo baahidaada luuqeed ama codsiga caawimaada. Waad ku mahadsan tahay inaad isbaarto aadna naga caawiso inaan dhawrno badqabka bulshadeena.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka COVID-19, booqo: mn.gov/covid19

[muusig kacsan]

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

2/2/21 (Somali)

Si aad macluumaadkan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-4989